



Mashruuca Horumarinta Caafimaadka Maanka ee Fayl iyo Kardiff [Cardiff & The Vale Mental Health Development Project]

Adeegyada Caafimaadka Maanka Kardiff iyo Fayl-ka Glamorgan [Cardiff and the Vale of Glamorgan]

Waxaad ku mahadsantahay inaad fiirisay shabakadda Mashruuca Horumarinta Caafimaadka Maanka ee Kardiff iyo Fayl. Shabakadda waxay ku siineysaa warbixin ku saabsan shaqada Mashruuca Adeegyada Caafimaadka Maanka ee gudaha Kardiff iyo Fayl-ka Glamorgan [Directory of Mental Health Services in Cardiff and the Vale of Glamorgan].

Tusiyahaa wuxu ku siinayaa warbixin ku saabsan adeegyada la helo loogu talagalay dadka qaba baahi caafimaad maan. Waxay dabooshaa adeegyada loogu talagalay carruurta iyo dadka dhallinta yar, dadka waaweyn iyo dadka waayeelka ah.

Waxaa ka mida warbixin ku saabsan

- Arrimo sharciyeed – tusaale Qaanuunka Caafimaadka Maanka [Mental Health Act] iyo Qaanuunka Daryeeleyaasha [Carers Acts]
- Adeegyada ay bixiso qaybta ku dhisan qaanuunka - Wakaaladda Adeegyada Caafimaadka Qaranka deegaaneed (NHS), Mas'uuliyiinta Deegaanka iyo Booliiska.
- Adeegyo ay bixiyaan ururro mutadawic ah
- Liis khadad-cawinaad ee taleefonno.

Nasiibdarro ma annu lihin dhaqaale aan ku tarjamno Tusiyaha luqado kale.

See baad u heleysaa adeegyadaan

Haddaan dooneyso inaad hesho adeegyadaan marka kuugu horreyso, waxaad sida caadiga u baahan tahay inaad la xiriirto GP-gaaga awwalan. GP-gu wuxu qiimeynayaa baahida wuxuna kuu gudbinayaa Kooxda Caafimaadka Maanka ee Bulshada [Community Mental Health Team] oo qaabbilsan aaggaaya.

Haddu ku qimeeyo baahida degdeg (halka qof khatar u yahay naaftiisa ama dadka kale) waxa jira qaab loogu talagalay qiimeyn dhaqso ah.

Baahida luqado

Hayadahan ku dhisan qaanuunka oo soo socda ayaa kari kara iney helaan adeeg tarjumo halkii loo baahdo:

- Wakaaladda NHS-ka ee Kardiif iyo Faylka Glamorgan [Cardiff and Vale NHS Trust] (ka bixisa adeegyo caafimaadka maanka Kardiff iyo Bariga Fayl-ka Glamorgan [Eastern Vale of Glamorgan]) : Adeegyo turjumo lagu bixiyo waji ka waji ama khadka-luqadaha.
- Golaha Fayl-ka Glamorgan
- Golaha Kardiff
- Wakaaladda Bro Morgannwyg NHS (qaabbilsan Galbeedka Fayl-ka Glamorgan (Western Vale of Glamorgan))

Jawaab-soocelinta Mashruuca Horumarinta Caafimaadka Maanka

Nasiibdarro Mashruuca Horumarinta Maanka ee Kardiff iyo Fayl ma laha shaqaale kari kara iney luqado kale ku hadlaan, laakiin waan soo dhaweyneynaa jawaab-soocelin kasta ku saabsan shabakaddaan iyo tusiyaha si aan u sii wadno inaan sii hagaajino.

Mahadsanid

www.cvmhdp.org.uk

Tel 029 2022 2000 Fax 029 2023 8258